



Balaadhinta Tukaamada Fresh Bucks

Guudmarka Nidaamka Xulashada Tukaamad Yaryar ee Cuntada

Maarso 2021

Magaalada Seattle

Shaxda Macluumaadka

I. Taariikhda iyo Hordhaca	2
II. Guudmarka Nidaamka Xulashada	2
III. Shuruudaha U Qalanka	3
IV. Jadwalka iyo Madalaha Macluumaadka	5
V. Isdhaxgelinta Gunooyinka Elektorooniga ah iyo Khayraadka Bilawga ee Tukaamada La Xushay	6
VI. Shuruudaha Xulashada Tukaamada	8
VII. Su'aalaha Foomka Rabitaanka iyo Boogashada Goobta U Qalanka	9
LIFAAQ A: Khariirada iyo Balaadhinta Mudnaanta Jaarka	12

Foomka Rabitaanka - Ku Eeg Maajo 14, 2021

Foomka rabitaanka oo wata tilmaamaha gudbinta waxaa [laga heleyaa halkan](#) oo waxa uu ku eeg yahay **Maay 14 11:59 habeenimo**. Tukaamada doonaya waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay eegaan waraaqahan kahor inta ayna soo gudbin foomka rabitaanka.

Su'aalo?

Hadii aad su'aalo ka qabto Fresh Bucks ama nidaamka doorashada, fadlan iimeel ugu dir Alyssa Patrick FreshBucksRetail@seattle.gov ama kala hadal 206-256-5501. Marka aad soo hadasho, waxa aad noo reebtaa faariin aad ku sheegeyso luuqadaada, waxaan kugu soo celin doonaa anaka oo uu nala joogo turjubaan.



I. TAARIKHDA IYO HORDHACA

Fresh Bucks waxaa weeye barnaamij cunto caafimaad qabta oo Seattle xaruntiisu tahay oo hoos yimaada Xafiiska Magaalada Seattle ee Joogtaynta iyo Deegaanka oo ka caawiya qoysaska iyo shakhsiyaadka miisaaniyada cuntada. Janaayo 2021, ku dhawaad 12,000 oo qoys ayaa ku jira barnaamijka fagtuurka Fresh Bucks. Qoysaska ku jira waxa ay helaan \$40 bishii oo ay kaga iibsadaan **khuraad darayga ah ee cagaarka ah** sariibada, miisaska khudaarka iyo tukaanka ku jira.

Fresh Bucks waxa loogu talo geley in meesha lagaga saaro ka sadbursashada cuntada caafimaadka qabta ee bulshooyinka Laatiinka, Madaw/Maraykanka Madaw, Hindida Maraykanka/Dhalad Alaaska (AIAN), Dhalad Jasiiradaha Baasifiga (NHPI) bulshooyinka ah, iyo sidoo kale dadka soo galaytiga iyo qaxootiga ah ee qaba caqabadahaas luuqada, kuwaas oo diirada saaraya fagtuurka Fresh Bucks. 2020, 70% dadka ku jiray waxay kasoo jeedeen bulshooyinkan mudnaan tala siiyay.

Balaadhinta Tukaamada Fresh Bucks

2021, Fresh Bucks waxa ay ka wareegeysaa fagtuuradii waraaqaha ahaa waxaana laga dhigayaa nidaam gunooyinka ah oo elektoroonig ah, taas oo u fududaynaysa macaamiisha iyo tukaamada inay isticmaalaan gunooyinka. Inta aanu u wareegeyno nidaamkan cusub, Magaaladu waxay sidoo kale kordhinaysaa dalada tukaamada Fresh Bucks. Fresh Bucks waxa ay doonayaan inay kala shaqeeyaan tukaamada leh deegaamo badan oo tukaamo ah ee dhaqamada, qoomiyadaha iyo luuqadaha oo dhan soo dhaweeya, oo si joogto ah ugu keena xaafada cunto daray ah oo tayo leh meelaha ay degan yihiin dadka mudnaanta la siiyay iyo ka shaqeeyaan. Daladeena tukaamada wakhtigan waxaa kamid ah hal subar maarkeet oo meelo badan ku leh qaybo, tukaamo yaryar oo cuntada iibiya, iyo dhamaan sariibadaha Seattle. 2021, waxa aanu xulanay **ilaa sadex subarmaarkeet oo meelo badan ku leh iyo/ama tukaano booshariyo ah** iyo **ilaa sadeed tukaan oo cunto oo yaryar**. Nidaamka xulashada iyo foomka rabitaanka ee waraaqahan waxa tukaamada raashinka ee yaryar ayaa loogu talo geley. Nidaamka xulashada iyo arjiga subarmaarkeetyada iyo booshariyada waxaa [laga heli karaa halkan](#).

II. GUUDMARKA NIDAAMKA XULASHADA EE TUKAAMADA CUNTADA EE YARYAR

Mid kamid ah yoolashada kowaad ee balaadhintani waxaa weeye in la kordhiyo tirada tukaamada yaryar ee cuntada, ee madaxa banaan ee macaamiisha ay ku isticmaali karaan Fresh Bucks, iyada oo diirada la saarayo tukaamada iibiya cuntooyinka dhaqamada gaarka ah iyo/ama kuwa ku yaala xaafada ama u dhaw meelaha ay ku yar tahay helitaanka cuntooyinka darayga ah iyo tukaamo hore u qaadan jiray Fresh Bucks (eeg boga 4 wixii faahfaahin ah). Waxa aanu ku sheegnaa tukaamada cuntada yaryar inay yihiin kuwa gaar loo leeyahay oo lagu iibiyo raashinka kuwaas oo muhiim u ah qaabks ganacsiga iyo dakhliga sanadkii sida ay ka warbixisay Magaalada Seattle oo aan ka badnayn \$2 milyan. Waxa taas kamid ah laakiin kuma koobna suuqa yaryar, raashinka dhaqamada u gaarka ah, iyo miisaska raashinka.

Nidaamka Xulashada

Waxa aanu dooranaynaa **tirada ugu badan ee tukaamada yaryar ah ee raashinka** nidaamkeena labaad ee soo socda:



Talaabada 1: Qiimaynta Foomka Rabitaanka. Si aad u dalbato, tukaamada yaryar ee cuntada waa in aad marka hore buuxisaa oo aad gudbisaa foomka rabitaanka [oo ku jira halkan](#). Gudi shaqaalaha Magaalada ah iyo bulshada ay la shaqeyso ah ayaa qiimayn doona jawaabaha qiimaynta u qalanka, xulashada cuntada, iyo wixii barnaamijka ah ee la xidhiidha (tukaamada iibiya cuntooyin dhaqan ah iyo/ama ku yaala xaafadaha ay degan yihiin bulshada mudnaanta ahi ee ku qoran boga 4). U adeega macaamiisha Fresh Bucks oo deegaan ahaan iyo dhaqan ahaan kala duwan, iyada oo ku xidhan nidaamka qiimaynta waxaa la samayn doonaa qiimaynta baahiyaha tukaamada ee dalada tukaamada Fresh Bucks. Yoolkeenu waxaa weeye in macaamiisha Fresh Bucks ay helaan meelaha ugu badan ee cuntada darayga ah iyo dhaqanka ahaan ku haboon ay helaan ilaa inta macquulka ah.

Talaabada 2: Booqashooyinka Goobta. Tukaamada lagu xushay Talaabada 1 waxaa lagu soo casuumi doonaa inay ka qayb galaan booqashooyinka goobta. Shaqaalaha Fresh Bucks waxa ay booqan doonaan tukaamada la xushay si ay macluumaad dheeraad ah uga siiyaan barnaamijka oo ay u qiimeeyaandiyaar u ahaanshaha tukaanka iyo awoodiisa, maamulida dalaga, iyo wada shaqaynta bulshada. Booqashooyinka goobta waxaa lagu samayn doonaa luuqada cida tukaanka lagala xidhiidhayo. Booqashooyinka kadib, kooxda Fresh Bucks ayaa xulashada kama danbaysta ah samayn doonta.

Wakhtiga qaadashada xulashada tukaamada yaryar waxa ay ku xidhnaan doontaaheerka kaalmada ee loo baahan yahay iyo heshiisyada iyo nidaamka isdhexgalka teknooloojiyada. Waxa aanu doonaynaa in nidaamka gunooyinka ee elekrooniga ah inuu ka shaqeydo tukaamada 2021-2022. Tukaamada cuntada yaryar ee aan la xulan sanadkan waa la wargelin doonaa oo macluumaadkooda waxaa loo hayn doonaa nidaamyada xulashada mustaqbalka.

III. SHURUUDAHA U QALANKA

Tukaanadu waa inay buuxiyaan shuruudaha u qalanka si ay ugu qalmaan. Sidoo kale, tukaanadu waa inay kamid noqdaan mid kamid ah qaybta tukaanada dhaqanka gaarka ah **AMA** u adeegaan ugu yaraan xaafada mudnaanta ah ee ku qoran xaga hoose ee shaxda.

Shuruudaha U Qalanka

Tukaanadu waa inay buuxiyaan **DHAMAAN** shuruudaha soo socda ee u qalanka.

- Dakhliga sanadkii ee tukaanku waa in aanu ka badan \$2 milyan oo doolar sida lagu sheegey cashuuraadka ganacsi guud iyo shaqada (business and occupation, B&O) ee Waaxda Magaalada Seattle ee Dhaqaalaha iyo Adeegyada Maamulka.
- Tukaanku waa inuu haystaa liisan shaqaynaya oo ganacsi oo Magaalada Seattle ah.
- Tukaanku waa inuu leeyahay Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixinta oo waa inuu soo gudbiyaa foomka IRS W-9 marka laga dalbado.
- Tukaanka waa inuu si joogto ah u hayaa alaabta ugu yaraan 10 nooc ah ¹oo cuntada darayga ah.

¹ Nooca raashinka laga hadlayo waxaa weeye shayada dalaga ee degmooyinka dhaxdiisa, halkii ay ka noqon lahaayeen hal nooc oo waxyaabo kala duwan leh. Tusaale ahaan, tufaaxa ayaa loo arkaa hal nooc oo midho ah inuu yahay xataa hadii tukaanku uu leeyahay dhawr nooc oo kala duwan oo tufaax ah.



- Tukaanku waa inuu leeyahay Wi-Fi ama internetka taleefanka si uu app-ka Fresh Bucks ugu shaqeysiiyo.

MudnaantaXaafada iyo Tukaamada Dhaqanka U Gaarka ah

Shaxda 1: Tukaamadawaa inay noqdaan ugu yaraan mid kamid ah qaybaha tukaanada tafaariiqda ee dhaqanka ku haboon AMA u adeega ugu yaraan hal kamid ah xaafadaha mudnanata ah ee lagu sheegey shaxdan.	
Mudnaanta Tukaamada Dhaqanka U Gaarka ah	Xaafadaha Mudnaanta ah
<ul style="list-style-type: none"> • Booshariyada Aasiyaanka ah • Boorashiyada Bariga Afrika iyo/ama Xalaasha ah • Booshariyada Laatiinka ah <p>Booshariyada dhaqanka u gaarka ah waxaa lagu sheegey xog uruurintii 2020 ee macaamiisha Fresh Bucks iyo iyada oo lagala sheekeystay hay'adaga bulshooyinka ee la shaqeeya Fresh Bucks.</p> <p><i>*Oggow: Wixii tukaano ah ee ku qoran halkan ee sidoo kale buuxinaya shuruudaha way u qalmaan, xataa hadii ayna ku oolin xaafadaha mudnaanta ah.</i></p>	<p><i>Xaafadaha Mudnaanta 1:</i></p> <ul style="list-style-type: none"> • South Park, Delridge, High Point, Georgetown • Bitter Lake, Haller Lake, Lake City • International District, Beacon Hill, Central District, iyo Belltown <p><i>Xaafadaha Mudnaanta 2:</i> Jaantuka Qoomiyada iyo Sinaanta Bulshada (Race and Social Equity Index, RSE) ee xaafadaha mudnaanta sare (eeg khariirada Jaantuska A)</p> <p><i>Mudnaanta 1Xaafada</i> waxaa weeye aaga macaamiisha Fresh Bucks waxay u badan tahay inay degan yihiin meelo ay ku yar yihiin raashinka darayga ah iyo/ama Fresh Bucks.</p> <p><i>Xaafadaha Mudnaanta 2</i> waxaa weeye kuwa ay ku sheegtey Jaantuska Jaantuska RSE Magaalada Seattle inay ku yaal meelaha dadka ugu badan ee dakhligoodu hooseeyay ay ku nool yihiin iyo kuwa uu sadburiga caafimaad iyo waxyaabaha kale ee qoomiyada ku salaysan uu saameeyay. Mudnaanta waxaa la siinayaa tukaamada ku yaal <i>Xaafada Mudnaanta 1</i>. Eeg Ligaaqa A ee khariirada RSE iyo faahfaahinta xaafada ee dheeraadka ah.</p> <p><i>*Oggow: Wixii tukaamad yaryar ee cuntada ee ku yaal ama ku dhaw ee sidoo kale buuxinaya shuruudaha u qalanka waxay u qalmaan, xataa hadii aan lagu sheegin inay yihiin tukaanka dhaqanka u gaarka ah ee mudnaanta ah.</i></p>

IV. Jadwalka iyo Madasha Macluumaadka

Kuwa soo socda waxaa laga heleyaa macluumaadka guud ee jadwalka xulashada, halka loo gudbinayo foomamka rabitaanka, iyo duwaan gelinta madasha macluumaadka.

Jadwalka 2: Xulashada Jadwalka

Hawsha	Taariikhda
<p>Madalaha macluumaadka maqal iyo muuqaalka ah</p> <p>Madalaha macluumaadka waxay fursad u yihiin tukaamada si ay su'aalo uga waydiiyaan Fresh Bucks iyo nidaamka xulashada. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo linkiyada la iska duwaan gelinayo waxa ay ku jiraan hoos.</p>	<p>Khumiista, Abriil 8, 2021 marka ay tahay 1:00 duhurnimo.</p> <p>Khumiista, Abriil 29, 2021 marka ay tahay 3:00 galabnimo.</p>
<p>Foomka rabitaanku waxa uu ku eeg yahay</p> <p>foomamka rabitaanka waxaa laga helayaa halkan oo waa in la gudbiyaa ugu danbayn 11:59 habeenimo. Foomamka waxaa lagu gudbin karaa onleyn ahaan ama taleefanka 206-256-5503. Marka aad soo hadasho, waxa aad noo reebtaa faariin aad ku sheegeyso luuqadaada, waxaan kugu soo celin doonaa anaka oo uu nala joogo turjubaan.</p>	<p>Jimcaha, Maay 14, 2021 markay tahay 11:59 habeenimo.</p>
<p>Booqashooyinka goobta iyo qiimaynta</p> <p>Gudida shaqaalaha Magaalada iyo iskaashiga bulshada ayaa qiimayn doona foomamka rabitaanka ee tukaamada la sheegey si loogu gudbiyo heerka booqashada goobta ee nidaamka xulashada. Inta lagu jiro booqashada goobaha, waxa aanu bixin doonaa macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijka Fresh Bucks iyo qiimaynta diyaar ahaanshaha tukaanka iyo awooda uu ku hirgelinyo barnaamijka, maamulaha cuntada, iyo wada shaqaynta bulshada. Booqashooyinka goobta waxaa lagu samayn doonaa luuqada cida tukaanka lagala xidhiidhayo.</p>	<p>Juun - Julaay</p>
<p>Naqdinta qiimaynta goobta iyo xulashada</p> <p>Kooxda Fresh Bucks ayaa qiimayn doona qiimaynta booqashada goobta oo waxa ay mudnaan siin doonaan xulashada.</p>	<p>Julaay</p>
<p>Xulashada tukaanka iyo wargelinta</p> <p>Tukaamada la doortay ayaa la wargelin doonaa wixii ku saabsan xulashada dhamaadka xagaaga. Tukaamada aan la dooran 2021 waxaa la hayn doonaa liiskooda oo</p>	<p>Agoosto</p>

waxaana loo hayn doonaa nidaamyada xulashada mustaqbalka.	
<p>Qaadashada cida lala shaqaynayo</p> <p>Nidaamka qaadashada waxaa kamid ah kaalmada bilawga qiimaynta iyo baahida awooda ee tukaan kasta, ka gorgortanka iyo saxeexida heshiisyada, u samaynta nidaamyada gunada ee elektorooniga ah tukaanka, iyo tobobarida shaqaalaha.</p>	<p>Qaadashadu waxay bilaabmaysaa horaanta dayrta 2021. Jadwalku wuu kala duwan yahay oo waxa uu ku xidhan yahay heerka kaalmada ee loo baahan yahay iyo qandaraas siinta iyo nidaamyada isdhaxgalka teknooloojiyada.</p>

Madasha Macluumaadka

Tukaamada doonaya waxaa lagu dhiiri geliyaa inay ka qayb galaan mid kamid ah laba madalood ee macluumaadka ee ay bixinayaan shaqaalaha Fresh Bucks. Madalaha macluumaadka waxa ay siiyaan tukaamada fursado ay ku waydiiyaan su'aalo oo ay ku dhagaystaan guudmarka fursadaha iskaashiga tukaamada iyo nidaamka xulashada.

Madaluhu waxay ku qabsoomi doonaa maqal iyo muuqaal ahaan, waxaana la leeyahay ikhtiyaar lagaga qayb geli karo onleyn ama taleefanka. Turjubaada luuqada iyo qaabilaadaha kale ayaa la heli karaa marka la dalbado. Tukaamada waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay is duwaan geliyaan iyaga oo isticmaalaya linkiyada hoose ugu yaraan hal todobaad kahor munaasabad kasta si loo samayn karo qaabilaadaha daruuriga ah.

Taariikhda iyo Saacadhaa Madalaha

- Khamiista, Abriil 8, 2021 markay tahay 1:00 duhurnimo. | Fadlan [iska duwaan geli halkan](#) ugu danbayn Abriil 5, 2021 hadii aad u baahan tahay qaabilaad.
- Khamiista, Abriil 29, 2021 marka ay tahay 3:00 galabnimo. | Fadlan [iska duwaan geli halkan](#) ugu danbayn Abriil 22, 2021 hadii aad u baahan tahay qaabilaad.

V. Isdhaxgelinta Gunooyinka Elektorooniga ah iyo Khayraadka Bilawga ee Tukaamada La Xushay

Nidaamka cusub ee gunooyinka elektorooniga ah, macaamiisha Fresh Bucks waxay ku heli doonaan gunooyinkooda bishii app-ka taleefanka iyo/ama kaadhka kaydka. Tukaamada yaryar ee cuntada ee Fresh Bucks waxay isticmaali doonaan shaxda ama app-ka taleefanka ee Fresh Bucks si ay uga shaqeeyaan xisaabaadka Fresh Bucks. Hoos waxaa ku yaal macluumaad ku saabsan isdhaxgalka teknooloojiyada, kharashka la xidhiidha, oo kaalmada Magaalada waxaa la siin doonaa tukaano la xushay.

Shaxda 3: Teknooloojiyada, Kharashka, iyo Kaalmada La Heli Karo



Teknooloojiyada Gunada Elektroonig ah	Kharashka Isdhaxgalka Teknooloojiyada	Kaalmada La Heli Karo
<p>App-ka Taleefanka Gunooyinka elektorooniga ah ee tukaanka, Solutrans, waxa uu bixiyaa shax dhigitaal ah oo app ah oo ka gaar ah nidaamka iyo duwaanka lacagaha goobta iibka (point of sale, POS).</p>	<p>Teknooloojiyada gunooyinka elektorooniga ah waxa ay u baahan yihiin liisanka sanadkii iyo kharashka xisaabaadka. Magaalada Seattle waxay siisaa kaalmo dhaqaale si ay uga caawiso tukaanada yaryar si ay ugu bixiyaan kharashkooda. Tusaale ahaan, Magaalada waxay bixisaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Kharashka liisanka sanadkii ilaa 5 isticmaale oo gaar ah liisankiiba. • Kharashka xisaabaadku waxa uu noqonayaa ilaa \$500/tukaankiiba/sanadkii (taas oo ah ilaa 3,333 xisaabaad/sanadkii). <p>Tukaanka ayaa ka masuul ah liisanka iyo kharashka xisaabaadka ee ka badan intaas. Kharashka tukaanadu way kala duwan yihiin, markaa Magaalaada ayaa faahfaahin dheeraad ah ka bixin doonta qiyaasta cida lala shaqaynayo ee la doortay taas oo kamid ah nidaamka qaadashada. Tukaamada sidoo kale waxaa looga baahan yahay inay hayaan shaxda iyo/ama aalada taleefanka ee meesha laga bixiyo lacagta ee nidaamka gunada elektorooniga ah.</p>	<p>Marka laga tago liiska ka tanaasulka kharashka ee qaybta "kharashka," Magaalada Seattle waxay bixisaa kaalmooyinka soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Si looga caawiyo kharashka bilawga hirgelinta barnaamijka, Magaaladu waxay siin doontaa tukaamada kharashka adeega oo aan ka badnayn \$3,500 sanadkii laba sano. • Shaqaalaha Fresh Bucks Magaalada Seattle waxa ay noqon doonaan isku xidhayaasha tukaanada iyo qandaraaslayaasha gunooyinka elektorooniga ah inta lagu jiro nidaamka qaadashada oo waxa ay siin doontaa tobobar shaqalaaha tukaanka.

VI. Shuruudaha Doorashada Tukaanka

Tukaamada loo xushay inay kamid noqdaan cida Fresh Bucks ay la shaqaynayso ee nidaamka waxaa la xidhiidhi doonta Magaalada Seattle iyo qandaraaslaha gunada elektorooniga ah si ay u aqbalaan oo loogu gudo kharashka macaamiisha Fresh Bucks alaabaadka ay ka qaadatay. Tukaamada waa inay ka qayb galaan nidaamka cusboonaysiinta sanadkii. Yoolkeenu waa in lasii wado qandaraaska tukaamada lala shaqaynayo ee buuxiya shuruudaha dib u cusboonaysiinta sanadkii meelaha ay garanayaan macaamiishu uga heli karta Fresh Bucks sanad kasta.

Tukaanada la doortay waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Waa inay u keenaan Magaalada iyo qandaraaslaha gunada elektorooniga ah Lambarka Cashuur Bixiyaha, foomka IRS W-9 iyo macluumaadka caymiska marka laga dalbado iyo sidoo kale waraaqaga kale ee qandaraaslaha gunada elektorooniga ah ee u samaynaya nidaamka u gudista.
- Waxay bixiyaan kharashka la xidhiidha isdhaxgelinta teknooloojiyada ee ka baxsan ee kharashka ka tanaasulka iyo awooda lacagta ee Magaalada Seattle ay siiso (waxaa lagu sharaxay shaxda 3).
- Abuurida iyo sidaa u daynta deegaanka leh soo dhawaynta iyo khibrada u dirida wanaagsan ee dadka isticmaala Fresh Bucks, oo waxaa kamid ah khasnajiyo soo dhawayn leh oo dadka u garaaba iyo calaamado sida loogu baahdo.
- U isticmaala astaanta Fresh Bucks, astaanta, iyo wixii macluumaad suuqgayn ee loogu baahan yahay tilmaamaha Magaalada Seattle. Wixii macluumaad ah ee uu abuurto tukaanka ee ay la socoto astaanka Fresh Bucks waa in la sameeyaa iyada oo la iska kaashanayo oo ansixin la waydiisanayao Magaalada Seattle.
- In la xaqiijiyo in maamulayaasha, qasnajiyada iyo adeegyada macaamiisha ee tukaanku inaynay qaadaan tobobaro hore iyo kuwa joogto ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo nidaamka elektorooniga ah ee gunooyinka, nidaamka xisaabaadka Fresh Bucks iyo ka caawinta macaamiisha Fresh Bucks isticmaalka gunooyinkooda. Tan waxaa kamid ah ka qayb galka tobobarada ay bixiso Magaaladu iyo in la siiyo tobobar shaqaalaha cusub.
- La socodka xisaabaadka Fresh Bucks si loo xaqiijiyo in kaliya shayada u qalmaa (khudaarta bisil iyo cagaaran) lagu iibsado gunooyinka Fresh Bucks.
- Raacitaanka iyo la socodka dhamaan siyaasadaha barnaamijka iyo u sheegida Magaalada Seattle wixii cilad ah si loo hormariyo barnaamijka.

Heshiiskan waxaa kamid ah, **Magaalada Seattle** inay siiso:

- Tobobarka hore iyo macluumaadka shaqaalaha tukaanka ee ku saabsan ka shaqaynta gunooyinka elektorooniga ah iyo ka caawinta macaamiisha xisaabaadkooda. Waxaa taas kamid ah macluumaad hordhac ah iyo tobobar madalaha tobobarka ah, iyo sidoo kale macluumaadka tobobarka oo lagu turjubay luuqada haboon.
- Kharashka adeegu kama badan karo \$3,500 sanadkii laba sano, kharashka bilawga ee la xidhiidha dhaqan gelinta barnaamijka.
- Kharashka liisanka ee ka tanaasulida ilaa shan isticmaale oo gaar ah iyo kharashka xisaabaadka ka tanaasuliada ilaa \$500 qandaraaslihiiba, sanadkii (taas oo noqonaysaa ilaa 3,333 oo xisaabood qandaraaslihiiba, sanadkii).
- Wixii macluumaad suuqgayn ah ee loogu talo geley in loo isticmaalo xayaysiinta Fresh Bucks.



- Kaalmada farsamo ee joogtada ah si loo xaqiijiyo dhaqan gelinta gunooyinka elektorooniga ah si guul ah.

VII. Su'aalaha Foomka Rabitaanka iyo Booqashada U Qalanka ee Goobta

Gudi shaqalaaha Magaalada ah iyo cida ay wada shaqeeyaan ayaa qiimayn doona foomamka rabitaanka si ay u qiimeeyaan tukaamada u qalma oo ay u eegaan sida rabitaanka tukaanka ee isku jiraa ay u buuxiyaan baahiyaha iyo rabitaanka macaamiisha Fresh Bucks. Su'aalaha foomka rabitaanka waxa lagu sheegey hoos macluumaadka sida loo isticmaalayo ee loogu qiimaynayo u qalanka iyo tukaamada mudnaanta leh goobta booqashada. Nidaamka qiimaynta sidoo kale waxaa kamid ah qiimaynta farqiga u dhaxeeya dalada tukaamada Fresh Bucks oo dhamaystiran, iyada oo lagu xisaabtamayo sida isku darka tukaamada ay u siin doonaan macaamiisha Fresh Bucks alaabaad badan oo daray ah oo ay meesha ka helaan iyo ikhtiyaaro dhaqankooda ku haboon.

Su'aalaha Foomka Rabitaanka	Shuruudaha Ujeedada/Qiimaynta
<p>Magaca Tukaanka:</p> <p>Macluumaadka xidhiidhka kowaad:</p> <p>Boosta cida lala xidhiidhayo:</p> <p>Lambarka taleefanka lagala xidhiidhayo:</p> <p>Lambarka taleefanka labaad (ikhtiyaar):</p> <p>Luuqada uu doorbidayo qofka lala xidhiidhayaa:</p> <p>limeelka lagala xidhiidhayo (ikhtiyaar):</p>	<p>Macluumaadka sheegaya haybta ee loo isticmaali doono si loola xidhiidho tukaanka la doortay si loogu sameeyo balanta booqashada goobta oo loo ogaado baahida luuqadeed.</p>
<p>Fadlan noo sheeg cinwaanka goobta tukaanka:</p>	<p>Cinwaanka tukaanka waxaa loo adeegsan doonaa si loo qiimeeyo hadii uu ku yaal ama u dhaw yahay (0.25 mayl u jiro) Xaafada <i>Mudnaanta 1 ama Mudnaanta 2</i> (eeg khariirada Jaantuska A ama shaxda boga 4).</p> <p>Si uu ugu qalmo, tukaanku waa inuu ku jiraa mid kamid ah qaybaha tukaanada raashinka ee dhaqamada gaarka ah AMA u shaqeeyaa ugu yaraan mid kamid ah xaafadaha mudnaanta ah.</p>
	<p>Cinwaanka tukaanka iyo goobta ayaa sidoo kale loo isticmaali doonaa si loo eego inta uu u jiro istaanka. Tukaanka u dhaw istaanka gaadiidka ayaa mudnaanta lasiin doonaa.</p>
<p>Miyaad haysataa liisan ganacsi oo shaqaynaya oo Magaalada Seattle ah? Fadlan sheeg lambarka liisanka.</p>	<p>Liisanka ganacsiga waxaa loo adeegsan doonaa si loo xaqiijiyo in tukaanku uu ka duwaan gashan yahay Magaalada. Si uu ugu qalmo, tukaanku waa</p>



Su'aalaha Foomka Rabitaanka	Shuruudaha Ujeedada/Qiimaynta
	inuu leeyhaya liisanka ganacsiga ee Magaalada Seattle.
Miyaad leedahay Wi-Fi aad ka geli karto taabletka ama taleefanka tukaankaaga si aad uga shaqayso gunada Fresh Bucks?	Helitaanka Wi-Fi ama internet taleefanka ah oo la isku halayn karo ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo xisaabaadka Fresh Bucks. Si uu ugu qalmo, tukaanku waa inuu yeeshaa Wi-Fi iyo/ama internetka taleefanka oo wanaagsan.
Miyaa ganacsigaaga ugu yaraan 51% ay leeyihiin dumar iyo/ama dadka laga tirada badan yahay?	Magaalada Seattle waxay ku sheegtee Ganacsigada Dumarka iyo Bulshada Laga Tirada Badan Yahay Leeyihiin (Women and Minority Owned Businesses, WMBE) kuwa ay ugu yaraan 51% ay leeyihiin dumar ama bulshada laga tirada badan yahay. Magaalada Seattle waxay si firfircoon u taageertaa iskaashiga qandaraaslayaasha WMBE. Tukaanada buuxiga shuruudahan waxa la siinayaa mudnaanta.
Imisa nooc oo cunto ah ayaad caadiyan haysaa oo kuu yaal maalin kasta?	Si uu ugu qalmo, tukaanku waa inuu si joogto ah u hayaa ugu yaraan 10 nooq oo cunto ah. Tukaamada iibiya waxka badan 10 nooc alaabaad ah ayaa lasiin doonaa mudnaanta.
Miyaad iibisaa alaabta iyo wixii cunto ee kale ee dhaqan ama qoomiyad u gaar ah ama buuxinaya baahiyo waxyaabaha xoolaha ka samaysan? Hadii ay sidaa tahay noo sheeg dhaqamada, qoomiyada iyo baahida waxyaabaha ka samaysan xoolaha ee tukaankaagu matalayo.	Booshariyada dhaqanka u gaarka ah waxaa lagu sheegey xog uruurintii 2020 ee macaamiisha Fresh Bucks iyo iyada oo lagala sheekeystay hay'adada bulshooyinka ee la shaqeeya Fresh Bucks: <ul style="list-style-type: none">• Booshariyada Aasiyaanka ah• Boorashiyada Bariga Afrika iyo/ama Xalaasha ah• Booshariyada Laatiinka ah Si uu ugu qalmo, tukaanku waa inuu ku jiraa mid kamid ah qaybaha tukaanada raashinka ee dhaqamada gaarka ah AMA u shaqeeyaa ugu yaraan mid kamid ah xaafadaha mudnaanta ah.
Maxaad u doonaysaa inaad uga mid noqoto tukaanada Fresh Bucks ?	Jawaabaha su'aashan waxa ay ka caawin doontaa kooxda qiimaynta Fresh Bucks inay bartaan tukaamada ku jira barnaamijyada iyo waxa ay




Su'aalaha Foomka Rabitaanka	Shuruudaha Ujeedada/Qiimaynta
	rajaynaynaan/sababaha ay ula shaqaynayaan Fresh Bucks.
<p>Si aad ugu qalanto xulashada tukaanka yar ee cuntada, ganacsiyada dhakhligooda sanadkii waa inayna ka badan \$2 milyan. Waxa aanu qiimayn doonaan dakhliga sanadkii taas oo ku salaysan cashuurta guud ee ganacsiga iyo shaqada (B&O) ee loo xareeyay Waaxda Magaalada Seattle ee Dhaqaalaha iyo Adeegyada Maamulka. Marka aad gudbiso foomkan rabitaanka, waxa aad u ogolaatay Xafiiska Magaalada Seattle ee Xasiloona & Deegaanka inay helaan oo ay qiimeeyaan macluumaadka cashuurta B&O ee ganacsigaagu gudbiyay.</p>	<p>Cashuurta B&O-gaaga waxaa loo isticmaali doonaa in lagu xaqiijiyo dakhligaaga sanadkii.</p> <p>Si uu ugu qalmo, tukaankaagu waa in aanu dakhligiisu aanu ka badan \$2 milyan sanadkii.</p>

JAANTUSKA A: Xaafadaha Mudnaanta Tukaamada Yaryar ee 2021

Hoos waxaa ku yaal khariirada Qoomiyada ugu mudnaan sareysa iyo jaantuska Sinaanta Bulshada ee xaafadaha iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaafadaha meesha ay ka heleyaan cuntada darayga ah iyo tukaamada hore u jiray ee Fresh Bucks ee yar.

Xaafadaha Mudnaanta Tukaamada 2021 ee Fresh Bucks





Xaafada Mudnaanta 1 waxa ay leeyihiin tiro yar oo meelaha laga heleyo cuntada darayga ah iyo tukaamada hore u jiray ee Fresh Bucks, kuwaas oo lagu sharaxay halkan:

- **South Park, Delridge, High Point, iyo Georgetown.** Xaafadahan waxa sheegtey Waaxda Caafimaadka - Seattle & Degmada King maadaama oo ay isa saaran yihiin sadex shay oo waawayni oo saameeya helitaanka cuntada caafimaadka qabta - qayb wayn oo kamid ah dadka degan waxa yar dakhligooda, wakhtiga lagu gaadhayo tukaamada cuntada caafimaadka qabta ayaa dheer, oo waxaa jira tukaamo badan oo iibiyo cuntooyinka aan caafimaadka qabin.² Waxaa sidoo kale jira laba tukaan oo kaliya oo Fresh Bucks ah oo ku yaal afartan xaafadood.
- **Bitter Lake, Haller Lake, Northgate, iyo Lake City.** Xaafadahan ku yaal waqooyiga Seattle waxaa sheegtey Waaxda Beeraha Maraykanka (United States Department of Agriculture, USDA) inay yihiin aag dad badan oo degan ay degan yihiin wax ka badan kala badh mayl wax u jira subarmaarketka. Sidoo kale, [warbixintooda Helitaanka Cuntada 2019](#), Caafimaadka Shacabka waxa uu sheegey aag yar oo ku yaal xaafadahan ay degan yihiin dadka dakhligoodu hooseeyo inay la kulmi karaan caqabad helitaanka cunto caafimaad qabta. Sidoo kale kaliya hal tukaan oo Fresh Bucks ah ayaa ka jira aagan.
- **International District, Beacon Hill, Central District, iyo Belltown** Ikhtiyaarada cuntada iyo Fresh Bucks ee ka jira International District, Central District, iyo Belltown waxay u badan yihiin sariibada iyo miisaska khudaarta lagu iibiyo oo shaqeeya saacado xadidan. Qaybtan Beacon Hill kamaba jiro wax tukaan Fresh Bucks ah.

² Iyada oo laga duulayo qiimaynta macluumaadka 2019 Caafimaadka Shacabka - Seattle iyo Degmada King (Public Health – Seattle & King County, PHSKC) [Warbixinta Helitaankeeda Cuntada Caafimaadka Qabta iyo Dalada Kaydka Cuntada](#). Ka hadalka aagaga mudnaanta cuntada caafimaadka qabta waxa uu ka bilaabmayaa boga 23 ee warbixinta.